



REPUBLIC OF

SOMALILAND

MINISTRY OF FINANCE

MINISTER OFFICE

Date: 29-09-2013

Ref: WM/02/08-01/1155/2013

Ku: Shir Gudoonka iyo xubnaha Golaha Wakiilada JSL Hargeysa

Ujeedo: Gudbinta Odoraska Miisaaniyadda Sannadka 2014:-

MudaneGudoomiye, Mudane Gudoomiye ku xigeen iyo Mudanayaal

Maanta oo ay taariikhdu tahay 29/09/2013 ,waxaan si wayn ugu faraxsanahay in aan idiin soo gudbiyo Miisaaniyada Dawlada ee sanadka 2014 ,aniga oo ku hadlaaya magaca Wasaarada Maaliyada oo gudanaysa waajibka Dastuurka Qaranka qodobkiisa **55^{aad}** farqadiisa **1^{aad}**.

Miisaaniyadda Sanadka 2014 waxay ka kooban tahay miisaaniyada dawlada dhexe,miisaaniyada hayadaha madaxbanaan,miisaaniyada dawlada hoose iyo miisaaniyada sanduuqa horumarinta Somaliland(Somaliland development fund) tafaasiisheeduna waasidan:-

| S/NO | Hayada | SLSH | Dollar |
|-------------|---|--------------------------|----------------------|
| 1. | Dawladda Dhexe | 912,000,000,000 | \$152,000,000 |
| 2. | Hayadaha Madaxa Banaan | 153,197,070,793 | \$25,532,846 |
| 3. | Dawladda Hoose | 129,836,638,953 | \$21,639,440 |
| 4. | Dakhliga Deeqaha caalamiga ah(Denmark& Britain) | 81,000,000,000 | \$13,500,000, |
| | Isugeyn | 1,276,033,716,000 | \$212,672,286 |

Hordhac

Mudanayaal hadaan warbixin idinka siiyo miisaaniyada dawlada dhexe waxay ka koobantahay kharash iyo dakhli isu dheelitiran waxaana labadoodaba ka muuqda korodhsiimo badan iyada oo aanay jirin cid caawimo dibadeed ina siisay iyo sidoo kale inaga oo aan khayraadkii dalkani lahaa ee dabiiciga ahaa aan weli lasoo bixin. islamarkaa hadaan faahfaahin idinka siiyo korodhkaasi wuxuu yahay sidan.

1. Korodhka Dakhliga miisaaniyada 2014

Korodhkan waxaa uu ka soo jeeda Dedaalka iyo ka midho dhalinta joogtada ah ee dakhliga Cashuuraha Berriga, kaasoo imika aanu ku hayno olole joogto ah in kastoo wali ay noo soo gacan galin qaybo ka midi. Waxaa kale oo intaas dheer Cashuurihii Kastamka ka soo hooyan jiray oo aanu sidoodii u qaadno, taasina ay keentay in dakhligii lumi jiray Dhamaantii soo xaroodo. Iyada oo aanu kutalagalay in dedaalkayaga iyo badeecadaha soo dega oo kordhaya uu dakhliga kastamku kordho 5% sanadka 2014 marka loo eego 2013 anagoo wax cashuur ah oo aanu kordhinaynaa aanu jirin, sidoo kale waxa kordha sanad kasta dhoofka xoolaha taas oo iyana ah meelaha kutalagalka dakhliga 2014 uu ka kordhayo.

Meelaha kale ee aanu dakhliga ka kordhinayno waxa kamida dakhliga isgaadhsiinta iyo kaluumaysiga taas oo sanadkii 2013 aanu u iibinay ciidamada bada doonyihii loogu talagalay ilaalinta xeebaha taas oo waxweyn katari doonta ilaalinta badeena iyo kor u qaadista dakhliga bada, sidoo kale waxa noo qorshaysan in sanadka 2014 xooga la saaro hirgelinta dakhliga isgaadhsiinta taas oo madaxweynuhu uu umagacaabay gudika hawlgasha kamidha dhalinta dakhligaas iyadoo la dhisi doono wasaaradii boosaha loona iibin doono qalabkii ay ubaahnaayeen.

Meelaha dakhliga sanadka 2014 ka kordhay waxaa kamid ah dakhliga dheeraadka ah ee kasoo wareegay sanadka 2012 ee hoos ku xusan iyo dheeriga kamuuqda jan-Augost 2013 ee isna hoos ku xusan oo kutusay calaamad ah in dakhligu kordhayo sanadka 2014.

Waxa kale oo mudanayaal jira in dakhliga kasoo xaroon doona khidmada dhoofka xoolaha wadooyinka ee golaha wakiiladu ansixiyeen uu kujiro kutalagalka dakhliga miisaaniyada 2014 taasina ay tahay meelaha korodhsiimada dakhligu ka imanayso.

Sidaynu wada ognahay dalkan Jamhuuriyadda Somaliland sidii uu Madaxbanaanidiisa u la soo noqday, ma jirto wax deeq Miisaaniyadeed ah oo aduun weynaha inaga soo

gaadhay, waxaase halkaas aynu ku soo gaadhay dan wadaagnimada dhaqaalaha ee aynu dhaqanka u leenahay.

Markaa waxaan aaminsanahay, iskaashigaas oo si midaysan loo sii xoojiyaana inay qayb laxaad leh ka qaadanayso kobcinta dakhligiisana, markaa waxaan codsanayaa in Gurmadka Dakhli ururinta iyo Wacyigelinta Cashuur Bixinta, Qaran ahaan loo wada guntado.

- **Heerka Khasnada Dawladda ee Jan-August 2013.**

Haddii aan warbixin kooban ka bixino natiijadii ka soo baxday Odorokii Miisaaniyadda 2013, Dakhliga dhabta ah ee ina soo galay Jan-August 2013 wuxuu noqday **516,232,757,788/=** oo u dhiganta **\$86,038,793** halka kutalagalka dakhliga Jan-August 2013 uu noqday **500,000,000,000/=**, waxaana dheeraad kasoo baxay **16,232,757,784 /=** oo u dhiganta **\$2,705,459.63**. Sidoo kale waxa jira Dakhli dheeraada oo ah **30,460,000,000** kana soo wareegay sanadkii 2012 isla markaana aanay noo suura gelin inaanu ku daro miisaaniyadii 2013 kaas oo ku jira qasnada dawlada isla markaana aanu ku cadeynay xisaab-xidhkii 2012 aanu ugudbinay hantidhawraha guud ee qaranka kaas oo waqtigiisii ugudbay golaha wakiilada.

- **Madax xigayaasha Dakhliga Miisaaniyadda 2014**

Dakhliga Miisaaniyadda 2014 wuxuu u kala baxaa sidan:-

| Nooca Dakhliga | Dakhli | Percentage |
|-----------------------|------------------------|-------------------|
| Hadhaaga Khasnadda | 30,460,000,000 | 3.34 |
| Dakhliga Cashuuraha | 650,357,946,705 | 71.31 |
| Dakhliga adeega | 168,989,804,074 | 15.19 |
| Dakhliga Ganaaxyadda | 3,698,641,093 | 0.41 |
| Dakhliga Hantida | 64,383,571,555 | 7.06 |
| Kabka Dawladaha Hoose | 24,570,036,573 | 2.69 |
| Total | 912,000,000,000 | 100 |

Korodhka Kharashka Miisaaniyadda 2014

Miisaaniyaddan oo ah mid ka turjumaysa waxqabadka Dawladdan ee ku wajahan sanadkan ah **(Comprehensive Budget)** ahna mid wax ku ool ah taas oo ay kujiraan mashaariic horumarineed iyo korodh mushahar faah faahintooduna waa sidan.

- ✚ 20% Korodhka mushaharooyinka shaqaalaha iyo ciidamada
- ✚ Korodhka derejada ciidamada.
- ✚ Korodhka mushaharooyinka iyo gunada gudoomiyayaasha, kuxigeenada iyo gudida hayadaha madaxa banana
- ✚ Kharashka diiwaangelinta codbixiyayaasha
- ✚ Mashruuca Dib u dhiska wadooyinka
- ✚ Dhismaha Madaarka Burco iyo dib u dhiska madaarka Borama
- ✚ Mashruuca Xanaanada Xoolaha
- ✚ Dhismayaasha cusbitaalada buuhoodle iyo Wajaale
- ✚ Dhismayaasha dayrka cusbitaalka hargaysa iyo hoolka cusbitaalka TB hargaysa
- ✚ Dhismaha iskuulka Agoomaha Burco.
- ✚ Dhismaha Maktabada Qaranka
- ✚ Dhismaha Maktabada englishta ee Jaamacada Haragaysa
- ✚ Dhismayaasha xafiisyada dawlada sida:- Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinya , Deeganka & Reer miyiga , Ciyaaraha , Hanti dhawraha guud ee qaranka ,xafiisyada wasaarada maaliyada hargaysa iyo goboladaba,xafiisyada wasaarada arimaha bulshada ee baligubadle iyo gabiley, xafiiska wasaarada warfaafinta iyo Hoolka fanaaniinta qaranka iyo wasaarada awqaafta.
- ✚ Dhismayaasha Jaamacadaha Badhan, Burco , Berbera iyo Camuud
- ✚ Mashruuca daryeelka Ceelasha Biyaha.
- ✚ Dhismaha xarunta xasuuqa
- ✚ Dhismaha xarunta Dhaqanka iyo Noloshu Miyiga (center for heritage and rural life)
- ✚ Iibsiga rooga Garoonka kubada cagta Hargeysa
- ✚ Iibsiga dabdamiska
- ✚ Iibsiga gaadiidka Wasaaradaha iyo Ha'ayadaha .
- ✚ Iibsiga qalabka isku xidhka shirkadaha isgaadhsiinta.
- ✚ Kharashka dhiirigelinta xifdiga quraanka

1. Kharashka Miisaaniyadda Dawladda Dhexe :-


Miisaaniyadan dawladda dhexe ee sannadkan **2014** Waxay ka badan tahay Miisaaniyaddii ka horeysay ee 2013**21.6%**, Miisaaniyad kasta oo la sameeyana marnaba ma daboosho baahiyaha qaranka sanad walba ,sababta oo ah dakhliga ina soo gala oo mar walba ka hooseeya baahideena sidaan awgeed anagoo tixgelinayna sida ay u kala mudanyihiin baahideenu taas oo mudnaanta koowaad aanu siinay maamul wanaaga gaar ahaan nabadgelyada iyo garsoorka taas oo maamulwanaagu uu ka yahay miisaaniyada**63.06%**, sidoo kale waxa mudnaanta labaad aanu siinay adeega arrimaha bulshada gaar ahaan waxbarshada iyo caafimaadka taas oo arrimaha bulshadu miisaaniyada ka tahay **14.4% taas oo kabadan tii kal hore**, waxaanaanu ku kalsoonahay in qodobadaasi wax weyn ka tarayaan kor uqaadista iyo horumarka dalka. Waxa kale oo sanadkan xooga la saaray dub-udhiska kaabayaasha dhaqaalaha gaar ahaan wadooyinka taas oo qorshaha dawlada ee sanadka 2014 ay tahay in wadooyin badan wax laga qabto gaar ahaan wadada ceerigaabo oo baahi weyn loo qabo dhawaana madaxweynaha jsl uu dhaqax dhigay. Dhinaca kale hadaynu ka eegno kharashka miisaaniyada oo uqaybsama kharashka hawsha iyo shaqaalaha (salary and operation cost) iyo kharashka horumarinta waxaa miisaaniyada 2014 horumarin ahaan ugu jira **12.53%**.Tafaasiisha qodabada kor ku xusanina waa sidan.

Soo Koobida Kharashka Dawladda dhexe:-

| | Kharashka | Percentage |
|-------------------------|------------------------|-------------------|
| Kharashka shaqaalaha | 462,920,976,600 | 50.76 |
| Kharashka Hawsha Socota | 317,652,687,787 | 34.83 |
| Kh/Horumarinta | 114,231,842,768 | 12.53 |
| Kaalmooyinka | 10,920,505,085 | 1.20 |
| Deynta Qaranka | 6,273,987,760 | 0.69 |
| Isugeyn | 912,000,000,000 | 100 |

Kharashka Miisaaniyadda 2014


- Kharashka shaqaalaha
- Kharashka Hawsha Socota
- Kh/Horumarinta
- Kaalmooyinka
- Deynta Qaranka



- **Noocyada kharashka miisaaniyada sectoral**

- **Budget Sectors**

| | Budget 2012 in Sector | % |
|-------------------------------------|------------------------|------------|
| Environment Sector | 6,358,565,532 | 0.70 |
| Infrastructure and Natural Resource | 80,497,215,803 | 8.83 |
| Good Governance & Rule Law Sector | 575,099,430,240 | 63.06 |
| Economic Sector | 118,682,630,685 | 13.01 |
| Social Sector | 131,362,157,740 | 14.40 |
| Total | 912,000,000,000 | 100 |



1. Siyaasada Guud ee Miisaaniyadda 2014:-

Mudanayaal waxa jirta in sanadkii 2012 la bilaabay in miisaaniyad waliba ay yeelato siyaasad hagta taas oo madaxweynuhu uu u magacaabay gudida siyaasada miisaaniyada qaranka waxaanay gudidaasi madaxweynaha usoo gudbisaa talada siyaasada miisaaniyada wuxuuna soo saaraa lifaaq la raaciyo miisaaniyada taas oo ah siyaasadii miisaaniyada sidaas awgeed mudanayaal waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa siyaasadii miisaaniyada ee 2014waana sidan

A. Siyaasadda Guud ee Miisaaniyadda 2014

1. Waa in Deeqaha Caalamiga ahi lifaaq ahaan loo raaciyaa Miisaaniyadda Qaranka, si loo ogaado dhamaan Dakhliga dalka soo gala nooc kasta oo uu yahay.
2. Waa In la hirgeliyo Heshiis Qoraalka ay Wasaarada Qorsheyntu Udiyaarisay Wasaaradaha/Hayadaha dawlada iyo hayadaha caalamiga ah isla markaana wixii Hayadaha caalamiga ahi ku caawiyaan Hayadaha dawlada Heeshiisyadooda loo soo gudbiyo Wasaarada Maaliyada iyo Wasaarada Qorsheynta , sidoo kalana xisaab celintooda lixbiloodkiiba loo soo gudbiyo Wasaarada maaliyada.
3. Waa in Wasaaradda Qorshayntu soo gudbiso lacagta Sanduuqa horumarinta Somaliland (Somaliland Development fund) si loo raaciyo miisaaniyada 2014.
4. Waa in a Guddida Siyaasada Miisaaniyaddu sanadkii Hal mar la kulmaan Deeqbixiyayaasha (Donors)/UN ta iyo Hayadaha caalamiga ah(INGO'S) ee ka shaqeeya Dalka si loo qiimeeyo Mashaariicda ay wadaan Hayadahaasi.

5. Waa in Miisaaniyadda Sanadka 2014 Ay kabadnaato ugu yaraan **20%** Miisaaniyaddii Sanadkii 2013.
6. Waa in La magaacaabo Guddi Dib u qiimayn ku samaysa Hantida Dawladda sida Guryaha, Bakhaaradda ,Dhulka, iskaraabka IWM taas oo u gudoomiye u yahay Wasiirka Hawlahaguud isla markaana xubin uu ka yahay Wasiirka Maaliyadu. .
7. Waa in Sanadka 2014 xooga la saaraa sidii loo horumarin lahaa Wasaarada Boosaha iyo isgaadhsiinta islamarkaana la magacaabo Gudida isgaadhsiinta Qaranka oo ka kooban Wasiirka Wasaarada Boosta iyo Isgaadhsiinta,Wasiirka Maaliyada, Wasiirka Qorsheynta,Wasiirka Hawlaha Guud iyo Guryeynta iyo Gudoomiyaha Gudida Qandaraaska Qaranka taas oo uu Gudoomiye u noqon doono Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta.
8. Waa in la Xoojiyo Xidhiidhka Ganacsi iyo Dhaqaale ee Dalalka aynu jaarka nahay.
9. Waa in Mashaariicda horumarinta ee Miisaaniyadda 2014 meel la isugu geeyo, loo na sameeyo madax- xige u gaar ah oo lagu magacaabo madax-xigaha Mashaariicda horumarinta Dawladda.
10. Waa in Miisaaniyada Dawladaha hoose kharashka shaqaaluhu noqdaa ugu yaraan **25%**, kharashka hawl socodsintuna noqdaa ugubadnaan **30%**, sidoo kale kharashka mashaariicda horumarinta ee aanay kujirin deeqaha hay'adaha caalamiga ah isna waa inuu noqdaa ugu yaraan **35%**,kharashka deeq da dawladdaha hoose siiyaan hay'adaha dawlada dhexe ee deegaanadooda isna waa inuu noqdaa ugu badnaan **10%**.waxaana dabagelkeeda yeelanaya oo u xilsaaran arintan Wasaaradda Arimaha Gudaha, Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaarada Qorshaynta..
11. Kharashka Kabka Dawladaha hoose Waa in uu dhamaantii ku baxaa mashaariic horumarineed, marka laga reebo Dawladaha hoose ee derajadoodu yihiin B,C,D oo iyagu waxay helaan tahay waxa ku baxa kharashka hawl socodsinta.fulinta arintana waxa uxil saraan wasaarada arrimaha gudaha iyo wasaarada maaliyada.
12. Waa in hay'adaha madaxabanaan sida Wakaaladaha biyaha, Dekeda, Madbacada Qaranka, wershedaha laydhka iyo Baanka, Dakhliga ay soo saaraan uu noqdo **30%** mid kharash ahaan ugu baxa Mashaariic horumarineed.
13. Waa In Wasaaradda Qorshaynta iyo Wasaaradda Maaliyaddu si wada jir ah u dabagalaan Mashaariicda horumarinta Dawladda Dhexe, kuwa Caalamiga ah iyo hayadaha madaxa banaan ee dawlada.


- 14.**Waa in sanduuqii hawl gabka ee Shaqaalaha Dawladda dhexe iyo Ciidamada, Miisaaniyadda 2014 loogu daro qadar leeg intii lagu daray 2013 . Waana in si deg deg ah sanduuqaas ay Wasaarada shaqada iyo arrimaha Bulshadu usoo samaysaa xeerkaa hawlgabka ee lagu dhaqi lahaa. Waxaa kale oo ay Gudidu go'aamisay in aan shaqaale cusub la qoran sanadka 2014 , marka laga reebo wixii aan laga maarmayn.
- 15.**Waa in la Dhiirigeliyo Xafiisyada shaqo abuurka (Job-centars) ee Wasaarada shaqada iyo arrimaha Bulshadu hada gacanta ku hayso.
- 16.**Waa in Magaalooyinka waaweyn laga Dhisaa Garoomo ciyaareed iyadoo Dhulka laga dhisayana ay kawada hawl gelidonaan Helistiisa Wasiirka Ciyaaraha, Wasiirka Arrimaha Gudaha, Wasiirka Hawlaha Guud iyo Guryeynta, Gudoomiyayaasha Golayaasha Deegaanka iyo cidii loo Baahdo.
- 17.**Waa In shirkadaha Maalgashiga ee Ganacsiga nooc kasta oo uu yahay lacagaha ay bixiyaan lagu shubo khasnada Dawladda.
- 18.**Waa in Dhamaan Buugaagta lacag Qabashada ee Hayadaha madaxbanaan ee Dawladdu noqdaan kuwo ka diiwaangashan xafiiska xiisaabiyaha guud ee dawlada isla markaana dhamaantood laga daabacaa madbacada Qaranka. .
- 19.**Waa in Gudida Siyaasadda Miisaaniyadda Qaranku Saddex biloodkiiba halmar kulmaan si qiimayn ay ugu sameeyaan siyaasaddii Miisaaniyadda ee madaxweynuhu saxeexay
- 20.**Waa in Wasaarada Maaliyada loo qoondeeyo 160 askari oo Ciidanka ilaalada cashuuraha lagu kordhinayo sanadka 2014, isla markaana wasiirka maaliyadu wareegto kusoo saaraa shuruudaha looga baahanyahay ciidankaas. waana in wasaarada maaliyada miisaaniyadeeda lagu daro mushaharka iyo Raashinka ay yeelanayaan ciidamadaas iyo kuwii hore loo qaatayba.
- 21.**Si loo Dhiirigeliyo Wax soosaarka Dalka Waa in sanadka 2014 cashuurta soo Dejinta laga dhaafaa Dhamaan Riigaga Wax lagu qodo, Cagaf Cagafyada, laashashka kaluumaysiga, Shabaakta lagu kaluumaysto iyo Gaasta wax lagu karsado Sidoo kale waa in Wasaarada Maaliyadu dib u eegis ku samaysaa qiimaha Badeecadaha soo dega ee dalkeena laga so saaro si loo dhiirigeliyo Badeecadaha dalkeena kasoo baxa ama kuwa Wershadeheenu soo saaraan.
- 22.**Waa in Shaqaalaha iyo Ciidamada Dawladda Mushaharkooda Lagu kordhiyo 20% Miisaaniyadda Sanadka 2014.

23.Dhiirigelinta wax ku-kala iibsiga iyo isticmaalka lacagta dalku(somalilan shilling) waa waajib saaran muwaadinkasta mana aha wax ikhtiyaari ah (Somaliland is not dollar land)

B. Dakhliga Miisaaniyadda 2014

Ku talagalka Dakhliga Miisaaniyadda 2014 Waxa uu noqonayaa sidan :-

| S/NO | Hayada | SLSH | Dollar |
|------|---|--------------------------|----------------------|
| 5. | Dawladda Dhexe | 912,000,000,000 | \$152,000,000 |
| 6. | Hayadaha Madaxa Banaan | 153,197,070,793 | \$25,532,846 |
| 7. | Dawladda Hoose | 129,836,638,953 | \$21,639,440 |
| 8. | Dakhliga Deeqaha caalamiga ah(Denmark& Britain) | 81,000,000,000 | \$13,500,000, |
| | Isugeyn | 1,276,033,716,000 | \$212,672,286 |



Dakhligaasina waxa uu ka imanayaa:-

- ✚ Kastamada
- ✚ Cashuuraha Berriga
- ✚ Haamaha Shidaalka
- ✚ Isgaadhsiinta
- ✚ Liisamada Ganacsiga
- ✚ Kirada guryaha Dawladda iyo iibka Hantida Dawladda sida:- Iskaraabka.
- ✚ 50% kabka Dawladaha hoose
- ✚ Macdanta
- ✚ Kaluumaysiga
- ✚ Deeqaha hay'adaha madaxabanaan ee dawlada.
- ✚ Beeraha
- ✚ Dakhliga hay'adaha Madaxa banaan
- ✚ Dakhliga Dawladaha hoose
- ✚ 2% ka Gobolada Bariga
- ✚ Dakhliga takaaliifta horumarinta wadooyinka, fuel levy ga, road levy ga iyo levyga liisanka wadista Gaadiidka
- ✚ Deeqaha caalamiga ah ee tooska ah (Somaliland Development fund)

1. Si looga Midha dhaliyo kutalagalka Dakhliga Miisaniyadda 2014, Waa in Wasaaradda Maaliyadda Gacan xooga laga siiyo Dakhliga Cashuuraha Berriga Gaar ahaan Dakhliga Isgaadhsiinta, Xawaaladaha, Cashuurta Macaashal macaashka, Cashuurta Gadista, iibka Hantida Dawladda ,IWM isla markaana la sameeyo Wacyi galin balaadhan oo ay Hormood ka yihiin Madaxda Golayaasha Qaranku gaar ahaan Madaxweynaha JSL iyo Welibaa Gudida Siyaasadda Miisaaniyadda

C. Kharashka Miisaaniyadda 2014:-

Kharashka Dawlada dhexe waxaa saldhig u noqonaaya dakhliga oo ku tala galkiisu yahay **912,000,000,000 Sh.sl** oo udhiganta **\$152,000,000**

1. .Kharashkaas waxa mudnaanta lasiin doonaa sanadka 2014 qodobada hoos ku qoran:-
 - a. Nabadgelyada; gaar ahaan, Derajada ciidamada, saanada, qalabka iyo Tababarka ciidamada.
 - b. Kordhinta Mushaharooyinka Ciidamada iyo shaqaalaha dawladda oo ah 20%
 - c. Adeega Bulshada sida Caafimaadka, Biyaha, waxbarashada iyo dhalinyarada
 - d. Kobicinta waxsoosaarka dalka sida Xoolaha, Beeraha, Kaluumaysiga, wershedaha iyo ilaalinta Deegaanka
 - e. Kamidha Dhalinta Helista Aqoonsi buuxa oo uu Bulshada caalamka ka helo Dalka Jamhuuriyada Somaliland.
 - f. Kaabayaasha dhaqaalaha sida:- Dhismaha Wadooyinka iyo dib udhiska xafiisyada dawlada.
 - g. Casriyaynta Habka Cashuur ururinta (Improvement of tax system), wacyigelinta, ladagaalanka kootara baanka, ololaha cashuuraha iyo Samaynta Gunno xileedka Maamulayaasha Goobaha Dakhliga.

- h. Korodhka Gunadda Agaasimayaasha Guud oo noqonaysa 3000,000 Sh.SI Bishiiba iyo Agaasima waaxeedyada oo lagu kordhiyey 600,000 Sh.SI Bishiiba
 - i. Iyo Wixii soo raaci kara.
2. Waa in kharashka shidaalka Miisaaniyadda 2014 Wasaaradda Maaliyaddu ay bixiso bil walba dhamaadkeeda, Wasaaraduhuna aanay soo gudbin wax ka badan cadadka bishii ugu jira miisaaniyada, isla markaana waxa laysla qaatay in aan madax-xigaha shidaalka looga soo wareejin Karin kharash Madax-xige kale.
 3. Kharashaadka soo noqnoqda (**recurrent expenses**) sida shidaalka, stationaryga, spare partka IWM Waxa saldhig unoqonaya kii sanad Miisaaniyeedka 2013
 4. Diiwaangelinta sugida muwaadiniinta (**civil registration**) iyo kaqayb qaadashada diiwaangelinta cod-bixiyayaasha(**voter registration**)

Faahfaahinta Dakhliga Miisaaniyadda Qaranka 2014

Dakhliga Miisaaniyadda 2014 wuxuu ka kooban yahay **1,276,033,716,000/=** una dhiganta doolar ahaan **\$212,672,286** tafaasiisheeduna waxay tahay sidan hoos ku qoran:-

| Miisaaniyadda Haayadaha | SLSH | Dollar |
|--|-----------------|---------------|
| Miisaaniyadda Dawladda Dhexe | 912,000,000,000 | 152,000,000 |
| Miisaaniyadda Dawladaha Hoose | 129,836,638,953 | 21,639,440 |
| Miisaaniyadda Baanka Dhexe | 20,451,754,117 | 3,408,626 |
| Miisaaniyadda Wakaaladda Dekedda Berbera. | 47,853,824,820 | 7,975,637 |
| Miisaaniyadda Wakaaladdaha Biyaha | 44,145,606,159 | 7,357,601 |
| Miisaaniyadda Haamaha Shiidaalka Berbera | 17,478,768,000 | 2,913,128 |
| Miisaaniyadda Warshada Laydhka ee Hargeysa | 15,915,301,864 | 2,652,551 |
| Miisaaniyadda Wershada Laydhka Berbera | 2,687,243,003 | 447,874 |
| Miisaaniyadda Madbacada Qaranka | 2,721,646,530 | 453,608 |
| Wasaaradda Duulista & Hawada | 1,942,926,300 | 323,821 |
| Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF) | 81,000,000,000 | 13,500,000 |

Wax ka Bedelka Tacriifada

Sida caadadu tahay waxaa wax ka bedel iyo dub u eegis lagu sameeyaa tacriifooyinka Cashuuraha iyo Adeegyada Dawladdu qaado sanadkiiba hal mar.

Sidaas darteed; Sanadkan waxaa laysla qaatay in aan waxba la kordhin wixii jiray wax la yareeyo mooyee isla markaa waxa wax ka bedel lagu sameeyay tacriifooyinka Cashuuraha hoos ku qaran waxaana la unkay liisamo aan hore ujirin waana sidan soo socota:

| S/NO | Magaca Wasaaradda | Nooca Cashuurta/Fee ga | Tacriifadii Hore | Tacriifada Cusub |
|------|--------------------------------|---|------------------|--|
| 1. | Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha | Diiwaangelinta iyo Cusboonaysiinta Liisamada hore(prospecting) ee Macdanta (Muwaadinka) | | Marka la is diiwaangelinayo 2,000,000/= Marka la cusboonaysiinyana 2,000,000/= |
| | | Iibsade (Dealer) | | Marka la is diiwaangelinayo 2,000,000/= Marka la cusboonaysiinyana 2,000,000/= |
| | | Liisanka macda qodista(Minning) | | Marka la is diiwaangelinayo 6,000,000/= Marka la cusboonayssinayana 6,000,000/= |
| | | Diiwaangelinta iyo cusboonaysinta liisamada hore (prospecting) ee macdanta (Ajaanibka) Foreign | | Marka la is diiwaangelinayo \$2000 Marka la cusboonaysiinyana \$2000 |
| | | Fasax Gaar ah(ExCLUSIVE) | | \$2000 |
| | | Liisanka macda qodista(Minning) | | Marka la is diiwaangelinayo \$5000 Marka la cusboonayssinayana \$5000 |
| | | Cashuurta Royaalatiga Macdanta qoruxda(Gemstones) | - | 5% of the Value |
| | | Cashuurta Royaalatiga Macdanta ku dhaw qoruxda(Simi precious) | - | 3% of the Value |

| | | | | |
|--|-----------------------------|---|---|---|
| | | Stones) | | |
| | | Cashuurta Waxsoosaarka Milixda 50 Kg | - | 1000 /= |
| | | Diiwaangelinta iyo Cusboonaysiinta Liisamada Kaawada Dhagaxa dhismaha(Query Permission) | | Marka la is diiwaangelinayo 2,000,000 /= Marka la cusboonayssinayana 2,000,000/= |
| | | Dhagaxa dhismaha(Deberka) halkii Lawdh kiiba | | 10,000 /= |
| | | Dhagaxa dhismaha(Cadaan& Casaan) halkii Lawdh kiiba | - | 30,000 /= |
| | | Niista iyo Nuurada Halkii Lawdh | | 5000 /= |
| | | Jayga Halki lawdh | | 12000/= |
| | | Diiwaangelinta iyo Cusboonaysiinta Liisamada Karasharka | | Marka la is diiwaangelinayo 2000,000 /= Marka la cusboonayssinayana 2000,000/= |
| | | Cashuurta Royaalatyga Birta Caydhiin(IRON ORE) | | 5% of the Value |
| | Wasaaradda Ganacsiga | Professional Service Licence | | |
| | | Category 1 | | |
| | | Local | - | |
| | | Auditing Firm Accounting Firm Sales and Marketing Firm Economic Firm ICT Firm Logistic and procurement | | Sole proprietor \$ 150 Partnership \$ 300 |
| | | Foreigners and Joint Venture | | |

| | | | | |
|--|--|---|--|--|
| | | Auditing Firm Accounting Firm Sales and Marketing Firm Economic Firm ICT Firm Logistic and procurement | | Sole proprietor \$ 1,000 Partnership \$ 2,000 |
| | | Category 2 (local) | | |
| | | Media Firm | | |
| | | Engineering Consultant Laundry Firm Beauty Salon Advertisement firm | | Sole proprietor \$ 300 Partnership \$ 5,00 |
| | | | | |
| | | Category 2 (Foreigners and Joint Venture) | | |
| | | Auditing Firm Accounting Firm Sales and Marketing Firm Economic Firm ICT Firm Logistic and procurement Category 3(local) | | Sole proprietor \$ 1,500 Partnership \$ 3,000 |
| | | | | |
| | | Monitoring And evaluation Firm Environmental assessment firm Fund Management Firm Commission agency Laboratory firm Sanitation Firm Traveling and tourism firm Classic tourism Hotels Archeology Firm | | Sole proprietor \$ 500 Partnership \$ 800 |

| | | | | |
|--|------------------------------|--|---------------------|--|
| | | Social and Security Companies | | |
| | | | | |
| | | Category 3(Foreigners and Joint Venture) | | |
| | | | | |
| | | Monitoring And evaluation Firm Environmental assessment firm Fund Management Firm Commission agency Laboratory firm Sanitation Firm Traveling and tourism firm Classic tourism Hotels Archeology Firm Social and Security Companies | | Sole proprietor \$ 1,500 Partnership \$ 3,000 |
| | Wasaaradda Maaliyadda | Cashuurta Kala wareejinta Gaadiidka basaska iyo Tagaasida | 3% Qiimaha Gaadhiga | \$ 55 (Fixed) Halkii kala wareejinba |
| | | Gadiidka Kale oo dhan | 3% Qiimaha Gaadhiga | \$105 (Fixed) Halkii kala wareejinba |
| | | Liisanka Rarista & Dejinta (Clearanse and forwading) | \$500 | \$250 |

Gebaqabo

Mudanayaal, iyadoo ay ka jirto Dunida dhaqaale xumo iyo dhibatooyin farabadan oo ka haysta xaga horumarka oo saameeyey dhammaan Dawladihii Horumaray ee aduunka iyo kuwa dunida saddexaad oo hoos u dhac dhaqaale iyo sicir barar balaadhan saameeyey, dalkeenuna la qabo aduunka. Hadana waxa Ilaahay mahadiis ah in Miisaaniyadda Dawladda Dhexe 2014 ka ay ka badantahay **21.6% miisaaniyadii hore ee 2013**, sidoo kale hadii la barbar dhigo Miisaaniyadii 2010 oo ahayd wakhtigii xilka dawladdani la wareegtay waxay miisaaniyadani dheertahay **224%**.

Mudanayaal, aniga oo aan waxba kala hadhayn dadaalka lagu hirglinayo Odoroska Miisaaniyadda sannadkan, waxan ku kalsoonahay inaanu ka midho dhalin doono idinkuna aad gacan buuxda naga siin doontaan wixii aanu idiinka baahano Insha Allah.

Sidaas awgeed; waxaan si sharaf iyo maamuus leh idiinka codsanayaa ansixinta Miisaaniyada idin hor taala ee sanadkan 2014 ka, lifaaqa wax ka bedalka Tacriifada iyo siyaasada miisaaniyada 2014 ee ku lifaaqan idinkoo waajibaadkiina Distoriga ah gudanaya.

Salaamu Calaykum

Allaa

Mahad

Leh

(C/casiis Maxamed Samaale)
Wasiirka Wasaarada Maaliyada